



5 Juun 2020

Mudane waalid iyo daryeelaha ardayda sanadka 10aad

Waxaan idinka raali gelinaya dhererka warqaddaan laakiin waxaa ku jira warbixinno muhiim ah.

Sida aad ogtahay, waxaannu sameynay qorshe ballaaran oo uu iskuulku ku eegaayo qatarta si loo awoodo in ilmaha siyo xiriir weji ka weji ah. Sida loo sameynayo [dowladda](#) ayaa daabacday 25 bisha shanaad. Sida uu ra'isul wasaaruhu sheegay 28 bisha shanaad iskuulada sare waa inay furaan laga billaabo 15ka bisha lixaad waxaana isku aadinaynaa qorshihii ardayda sanadka 10aad waxbarid weji ka weji ah loo siin lahaa. Sidaan horay idiinkugu sheegnay taasi waxa ay dhacaysaa inta u dhexeyso 15 bisha lixaad illaa 3 bisha toddobaad.

Warbixin faahfaahsan oo dheeri ah, oo ay ku jiraan jadwalka ardayda oo gaar gaar ah waxa uu diyaar noqonayaa isbuuca soo socda marka guddiga iskuulka kor ka muumula ay eegaan oo ay nagu raacaan sida aan u sameynay ka hortagga qatarta si iskuulka si ballaaran loo furo. Sidaas darteed, maanta waxaan idinla wadaagayaa waxa aasaasiga ah oo la iska rabo iyo tillaabadha aad naga filan karto si aan u xaqijinno bad qabka ardayda markay dib ugu soo noqdaan iskuulka.

Qorshaheenna waxaa safka hore uga jira inaan xaqijinno in ardayda oo dhan iyo shaqaaluhu ay yihiin kuwo badqaba oo qatar kasta looga hortago sida ugu haboon oo la awoodo iyadoo la raacaayo habraaci ay dowladdu soo saartay iyo shuruucda bad iyo caafimaad qabka. Habraaca wasaaradda waxbarashada waxa uu sheegayaa in 25% ardayda sandka 10aad inay hal mar ay imaan karaan iskuulka dhexdiisa si wax loogu dhigo. Iyadoo lagu socanaayo qiyaasta SAGE, qaabka kala horreynta loo yareynayo qatarta ee aan qorshaheenna aan ku darsannay si looga hortago faafitaan COVID-19. Halkaan hoose ayey yihiin sida loo ilaalinayo:

- Waxaa la ilaalinaya faafitaanka cudurka: waxaa la yareynaya la kulanka ilmaha iyo dadka waaweyn ee xanuunsan iayadoo la xaqijinayo qofkii calaamadaha cudurka Caronaha qaba amaba uu gurigoodha joogo qof qaba cudurkaas, inuusan iskuulka imaan.
- Nadaafadda shaqsiga ayaa lagu ilaalinaya laguna maareynaya: Nadiifi gacmahaada in ka badan intii hore si dhab ah muddo 20 ilbiriqsi ah adigoo isticmaalaya biyo socda iyo saabuun ka bacdina si sax ah u qallaji ama isticmaal aalkoolka gacmaha laguirtiro amaba kuwa jeermiska lagu dilo adigoo isku dayaaya inaad dhammaan gaarsiiso dhinacyada gacmaha.
- In la xaqijiyo nadaafad neefsashada oo fiican: Waxaa la dhiiri gelinaya qaabka ah, qabo, qashinka ku tuur, dil
- Nadaafaddoo kor loo qaado: waxaa si joogto ah loo nadiifinaya meelaha la taabto iyadoo badanaa la isticmaalayo waxyaabo loogu talo galay in lagu nadiifiyo sida, saabuun iyo warankiilo.

Qorshayta waxabarshada weji ka wejiga ah ee sanadka 10aad waxa uu ahaa mid adag balse arday kastaahi waxa uu heli doonaa 2 saacadood oo uu kula kulmayo macallim ku tashasusay maadadaas, maaddo kasta oo uu imtixaan ku gelaayo. Waxaa muhiim ah in la ogaadho in wasaaradda waxbarashadu sheegtay in dhammaan dugsiyada sare ay siyyaan caawinaad weji ka weji ah si ay ugu



biiriyaan waxbarashada meesha fog laga qaadanayo oo ahaan doonta qaabka ugu weyn ee ay dhammaan ardaydu wax ku baranayaan teeramka 6.

Maalinta

Cashirka

Waxa uu ku saabsan yahay

Waxaa laga yaabaa in ardaydu iskuulka yimaadaan 3 maalmood waqtii 3 isbuuc ah. **Maalintiba, waxa ay weji ka weji u qaadan doonaan cashir uu dhigayo macallim maadadaa ku takhasusay oo labo maado ah.** Taas macnaheedu **waxa ay tahay, guud ahaan waxa ay weji ka weji u qaadan doonaan lix maado (kuwaasoo kala ah, Xisaab, Ingiriis, Saynis iyo seddexda maado oo ay doorteen).**

Maalin kasta oo uu ilmahaadu sikuulka joogo waxa uu raaci doonaa qaab isku mid ah;

- Cashirka koowaad- 2 saac oo weji ka weji ah ayuu maado uga qaadanayaa mallim maadadaa ku takhasusay
- Waqtiga nasashada- 20 daqiiqo
- Cashirka labaad- 2 saac oo weji ka weji ah ayuu maado uga qaadanayaa mallim maadadaa ku takhasusay

Arday yar ayaa iskuulka joogi doonta 3 ½ maalin iyo bar. Midani waa midaan laga fursan Karin oo ay sanbabeen sameynta jadwalka iyo qaab adag oo aan raacayno si aan ardayda koox koox uga dhigno.

Jadwalka ilmahaada waxaa la soo saari doonaa horraanta isbuuca soo socda waana la idiin soo diri adiga iyo iyagaba (oo google classroom baa loo soo digi). Tani waxa ay si cad u qeexi cashirka ay tahay inay yimaadaan.

Cashirada waxaa loo qaabeeeyay inay daboolaan inta soo socota:

1. Waxaa dib loo eegayaa maado aqooneedka ay gaareen waqtigii la kala xirnaa waana fursad dib loogu eegaayo waxyaabaha ku adkaaday ilmahaada.
2. Dood ku saabsan cashirada soo socda ee meesha dheer laga baran doono (Kuwaasoo ardayda ku qaadan doona illaa iyo dhammaadka teeramka 6)

Ma jiri doonaan in ka badan 25% ardayda sanadka 10aad oo maalin isla joogaya iskuulka. Ardaydaasi (qiyaastii 55) waxaa loo kala qeybin doonaa illaa 5 qeybood. Qeyb kasta waqtio kala duwan ayey billaabi/ nasiino tegi / bixi.

Xilliyada ay cashiradu billaabanyaan dhammaanayaanna sanduuqa hoose ayaa laga helayaa.



Group	Classroom	Designated Toilet	Session 1 timings		Designated Break	Session 2 timings	
			Start	End		Start	End
A	A101	A block	8.30	10.30	10.30 - 10.50 Lower tarmac	10.50	12.50
B	K003	Lower K block	8.40	10.40	10.40 - 11.00 Canopy area	11.00	1.00
C	C215	Science toilets	8.50	10.50	10.50 - 11.10 Upper tarmac	11.10	1.10
D	K105	Upper K block	9.00	11.00	11.00 - 11.20 Field	11.20	1.20
E	C201	Hub toilets	9.10	11.10	11.10 - 11.30 Lower tarmac	11.30	1.30

Kala fogaansho iyo Nadaafadda

Ardaydu waxay soo geli doonaan meel aad loo ilaaliyo. Wawaana sidaa loo sameynayaa si loo xaqijiyo badqabka ardayda iyo shaqaalaha waqtigaan

- Ardayda badankooda waxa ay ka qeyb noqon doonaan koox aan ka badnayn 11 (waxaa jira (4) oo ah min 12. Kuwaani waxa ay joogi doonaan meelo waasac ah oo hawadoodu fiican tahay sida ay qabto habraaca dugsiga sare ee dowladda
- Koox kasta waxaa la siin doonaa 2 x 2 saac oo cashir ah 3dooda maalin. Tani waxa ay u sahlaysaa iyagu inay weji ka weji waqtii uga helaan macallim maatada ku takhasusay labo maado maalinta ay joogaan iskuulka. Ardaydu ma ku darsoomi karaan ardayda kale oo isla maalintaa la casumay.
- Maalin kasta ardaydu 4 saac iyo 20 daqiqiyo ayey joogayaan. 2 saac oo cashir ah, lagu daray 20 daqiqiyo oo nasiino ah, oo lagu daray 2 saac oo sachir kale ah. Koox kasta waxey iskuulka soo gelaysaa kana baxaysaa xilli gaar ah oo 10 daqiqiyo ayaa u kala dhexeynaysa. Taasi waxa ay noo ogolaaneysaa in ardaydu aysan ku darsamin ardayda kale ee aan ka tirsaneyn kooxdooda. Waa muhiim in adiga iyo ilmahaadu ogaataan waqtiga ardayga la casumay oo ay soo gelaayaan baxaayaanna si ay dhammaantood u yimaadaan waqtii sax ah.
- Ardaydu waxa ay heli doonaan 20 daqiqiyo oo nasiino ah oo u dhexeysa 2da casir. Xilliga nasashaduna waxa uu noqonayaa mid xilliyo kala duwan la qaato si ilmahaadu uu ula qaato oo kaliya ilmaha ay isku kooxda yihiin. Taasi waxa ay xaqijinaysaa inaysan ku dersemin ardayda kale oo iskuulka lagu casumay. Ardaysu waxa ay isticmaalayaan oo kaliya meelo gaar ah oo loogu talo galay inay ku nastaan waana la geyn doonaa lagana soo celin doonaa meesha ay ku nasanayaan. Ardayda si dow ayaa looga warheyn doonaa oo waxaa ka warheyn doona shaqaale waayo aragyo ah inta ay nasiinada ku jiraan si ay u raacaan kala fogaanshaha bulshada iyo xeerka nadaafadda.
- Ma jiri doonto in iskuulka hal mar yimaadaan in ka badan rubac tirada sanadkaan. Sida aad ku aragtay warqaddaydi hore, ardayda sanadka 12naad waxa ay billabi doonaa 6da Juulay si aysan isugu imaan sanadaha kala duwan loona xaqijiyo kala dheeraanta bulshada. Waxbaridda ardayda waalidkood shaqooyinka muhiimka ah qabtaan iyo kuwa jilicsan waxaa lagu sameyn doonaa meel kale oo iskuulka ka mid ah.



- Arday kasta waxaa la siin doonaa meel gaar ah oo wax loogu dhigo iskuulka dhexdiisa iyo suuli u gaar ah oo ay isticmaali karaan. Markay yimaadaan iridda ardayda ayaa lagu salaami oo lagu dhiiri gelin inay gacmahooda jeermiska ka dilaan waxaana la weydiin doonaa inay ku sii socdaan barxadda laamiga ah ee hoose ee meesha lagu cayaaro.
- Ardayda waxaa halkaa ku salaami doona shaqaale iyo macallimka maalintaa cashirka koowaad u dhigi doona. Ka bacdina waxaa loo kaxeen doonaa meeshay wax ku baranayaan.
- Qol kasta waxa uu leeyahay meel ay yaallaan saabuun jeermiska la isagaga dhaqo oo ardayda la weydiin doono inay gacmaha si fiican isagaga dhaqaan markey soo galayaan iyo markay ka baxaayaanba fasalka iyadoo macallinka iyo shaqaale kale ay fiirinayaan.
- Wuxaan isticmaalaynaa fasalada ugu ballaaran iskuulka si loo dhigo cashirradaan. Dariishadahana wey furnaan doonaan waana la demin qaboojiyayaasha.
- Qol kasta waxaa loo diyaariyay si loo xaqijiyo in miisasku isu jiraan ugu yaraan labo mitir taasoo ogolaanaysa kala dheeraasho dadka oo cad.
- Ardayda lagama rabo inay xirtaan dharka iskuulka – ardayda waxaa lagu dhiiri gelinayaan inay soo xirtaan dhar ku haboon oo caadi ah amaba dharka isboortiga oo aan kugu dhiiri gelinayno inaan dhaqdo markaad guriga ku noqoto. Si ardayda badqabkooda loo ilaaliyo, ardayda oo dhan waxaa laga filanayaa inay xirtaan kaarkooda aqoonsiga xilli kasta si loo aqoonsado, waxaana la weydiin doonaa inay tusaan si loo aqoonsado markay soo gelaayaan iskuulka.
- Hab raaca wasaaradda waxbarashada wuxuu sheegay in maaska wejiga aanan loo soo jeedin iskuulada iyo meelaha kale ee wax lagu barto. Wejiga oo la dabooshoo waxa uu faa'iido leeyahay waqtii yar oo meel gudaha ah lagu jiro oo aad qatar ugu jirto in aad isu dowaataan dad aadan badanaa wada kulmin iyo meel aanan dadku kala fogaanshigiiisa iyo xeerarka kale aanan la ilaalin Karin tusaale ahaan, marka aad raaceysyo gaadiidka la raaco iyo dukaamada qaar. Midanina ma qusayso iskuulada amaba meelaha kale ee wax lagu barto. Iskuulada, meelaha kale ee wax lagu barto amaba ilmaha lagu xannaaneeyo waa inaysan ku waajib yeelin ardayda iyo shaqaalaha daboolitaanka wejiga. Balse, haddii waalidku rabo in ilmahooodu xirto wey xiran karaan.

Waxaa la dhiirigelinayaa akhlaaq wanaagsan oo nabdoon

- Waa muhiim in la ogaado in ardaydu imaam karaan iskuulka (5 daqiqo ka hor) waqtiga loo cayimay ee uu billaabanyo cashirkoodu. Haddii arday yimaado ka hor waqtigisa, waxaa la dhihi doonaa ku soo socsoco wareegga dhismaha oo soo noqo waqtiga saxda ah. Qaabka iyo sida ay ardaydu uga soo gelaayaan iriidda xafiiska ardayda si cad ayaa loo calaamadeyn doonaa oo calaamad 2 mitir ah ayaa lagu xardhayaa si loogu dhiiri geliyo ardayda inay dhowraan habraaca kala fogaanshaha dadka markay yimaadaan. Ardayda soo daahda, markey yimaadaan ayaa loo kaxeen doonaa fasalladooda. Fadlan ku dhiiri geli ilmahaada inay yimaadaan waqtiga saxda ah. Maalinta dhammaadkeeda, ardayda waxaa loo soo wedi doonaa inay ka baxaan dhismaha.
- Ardayda maalin kasta bilawgeeda waxaa loo sheegayaa hadal ku aadan badqabkooda oo qeexaya waxa aynu ka filanayno ee ku aadan kala fogaanshaha dadka iyo nadaafadda. Tanna waxaa ku jiraya isticmaalka fasaleetiga xaanshida ah iyo isticmaalka meesha qashinka lagu rido ee lugta lagu furo iyo xasuusin la xasuusinayo 'qabo, qashinka ku tuur, dil'.
- Akhbaar ku aadaan sida looga badbaadayo dabka oo dib u fiirin lagu sameeyay ayaa waxa lala wadaagayo ardayda ka mid ah oo qeyb ka ah kala hadalka badqabka.



- Waannu ognahay in lagu jiro xilligii sanboorka. Hadaba, ma aqbalayno arday si ula kac ah isaga keenkeenaya qufac iyo hindhisyo waqtii kasta uu iskuulka joogo, kaasoo welwel ku dhalinaya ardayda iyo shaqaalaha kale. Haddii ay taasi dhacdo, ardayga waxaa la weydiin doonaa inuu fasalka ka baxo waxaana kor kala soconaya shaqaale waayo arag ah waxaana lala xiriiri doonaa waalidka/daryeele. Qo'aan ayaana laga gaari, oo ah sida ay qabto siyaasadda akhlaaqda, inuu ardaygu iskuulka sii joogaayo iyo in kale. Waaan rajeynaynaa in dadka iskuulkeennu fahmaan muhiimadda iscaawinta waqtigaan iyo sida akhlaaqda issxushmayntu ay aasaasi ugu tahay dadka dhexdooda.
- Raacitaan la'aan la raaci waayo habraaca kala fogaanshaha dadka iyo nadaafadda waxaan u qaadanaynaa mid qatar ah maadaama badqabka iyo wanaagga guud ee ardayda iyo shaqaaluhu ay muhiim yihiin.

20 daqiiqo oo waqtiga nasashada

- Waqtiga ardaydu joogaan dhismaha, waxaa loo ogolaan doonaa inay aadaan suuliyada loo gaarka yeelay ee ku dhow fasalladooda marba mid. Ardayda waxaa lagu dhiiri gelin doonaa inay isticmaalaan suuliga billowga xisooyinkooda ama wax yar ka hor billowga waqtiga nasashada.
- Ardayda dhan waxaa loo sheegi inay jeermiska ka dilaan gacmahooda xoogaa ka hor waqtiga nasashada.
- Ardaydu waxa ay lahaan doonaan 20 daqiiqo oo nasiina ah inta u dhxeysa labada cashir. Waqtiga nasashadu waa kala qeybsan yahay oo ilmahaadu waxa uu waqtigaas la qaadanayaa oo kaliya ardayda kooxdiiisa ka tirsan; middani waxa ay xaqijinaysaa inaysan isku darsamin ardayda iskuulka lagu casumay. Ardaydu waxa ay kaliya isticmaalayaan meesha gaarka ah ee loogu talo galay inay ku nastaan waana la geyn doona lagana soo wedi doonaa. Ardayda waxaa kor kala soconaya shaqaale waayo arag ah xilliga ay nasiinada ku jiraan si loo xaqijiyo inay raacayaan sharciga kala fogaanshaha iyo nadaafadda.
- Ardaydu ma awoodi doonaan inay ka gataan raashin iyo biyo inta ay iskuulka joogaan. Meelihii biyaha laga cabi jirayna waa la xiray. Ardayda waxaa laga rabaa inay soo qaataan dhalo biyo ah oo buuxda iyo wax ay cunaan xilliga nasashada. Ardayda iyagu xaqqa u leh raashinka iskuulka lacag la'aanta ah waa la siin doonaa wax ay cunaan xilliga nasashada.
- Ardayda waxaa laga rabaa inay kala fogaadaan xilliga nasashada. Ma jiri doono cayaar banooni la ogol yahay ardayduna waa inay joogaan meesha loogu talo galay lana joogaan shaqaalaha la socda.

Qalabka iyo safarka

- Ardayda waxaa la siin doonaa jaldi uu jiro buug wax lagu qorto oo xarriijimo lah, buug 7mm oo xisaabta lagu dhigto, qalin madow iyo mastarad 15cm ah. Intaas oo dhan horay ayaa loogu diyaariyay si loo ilaaliyo nadaafadda. Ardaydu waxa ay u isticmaalayaan buugaagtaan inay wax ku qortaan, shaqona ku qabtaan cashir kasta. Ardayda waxaa laga rabaa inay intaa u qaataan xaafadahooda dhammaadka maalinta koowaad dibna u soo qaataan cashirrada kale. Suurta gal ma aha in warqado dheeri ah la amaahiyo amaba buugaag ardayda. Fadlan xaqiji inaad ku caawiso arintaan oo ay boorsadooda gashtaan jaldiga habeen ka hor maalinta ay tahay inay yimaadaan.
- Waxaa kaloo ardayda loo sheegayaa inay soo qaataan boorsadooda qalmaanta iyo qabalka waxbarshada. Ma awoodi doonno inaan ardayda ammaahinno qalab kale.



- Waxaan ku dhiiri gelinaynaa ardaydeenna inay iskuulka u soo lugeeyaan amaba ay u soo qaataan baaskil.
- Hadaba haddii ilmahaado uu soo qaadanayao baabuurta dadku raacaan, fadlan iyaga kala hadal muhiimadda dhaqitaanka gacmaha isla marka ay awoodaan, oo ay baaruurta ka soo degaan. Fadlan fiiri waqtiga ay soo jeediyeen inay safrayaan. Wasaaradda waxbarashada waxa ay soo saartay [habraac](#) ay raacayaan dadka raacaya baabuurta la raaco iyo talooyin kula talinaya dhammaan dadka raacaya baabuurta la raaco inay afka dabooshaan mar kasta oo ay safrayaan.
- Waa muhiim inay ardaydu kala fogaadaan markay iskuulka u soo socdaan iyo markay ka tegaayaan. Fadlan ku dhiiri geli inaysan koox koox isula socon.

Calaamadaha iyo jirro iskuulka dhexdiisa

- Ardaygu waa inuusan imaan iskuulka haddii ay ka muuqato wax Covic-19 calaamad u ah. Xiriiriye bogga NHSka oo ka hadlaaya calaamadaha Coronaviruska ayaa [halkaan](#) laga heli karaa.
- Haddii arday billaabo inuu la soo baxo calaamadahaas iskuulka dhexdiisa weynu gaar yeeli oo waxaanu geyni meel xafidan oo la joogi karo isla markaasna waannu kula soo xiriiri waalid/daryeele ahaan si aad ugu diyaariso soo wedid ama soo safrin. Ardayda calaamadahaas la soo baxay waa in la gaar yeelo iyadoo la raacayo [habraacca dowlladda](#). Waalidiinta waxaa lagu dhiiri gelinayaa inay ilmaha baaraan haddii ay calaamadahaas la soo baxaan; talooyinka sida baaritaanka loo sameyn karo halkaan baad [ka heli](#).

Waxaan aad u xiisaynaynaa inaan mar kale aragno ilmahaada oo aan fursad u helno inaan ku caawinno horumarinta aqoontooda.

Fadlan xaqiqso inaan sameynay wax kasta oo aan ku xaqijin karnay in iskuulka iyo ilmahaadu ahaadaan kuwo badqabo. Hadaba, waa dareensannahay in qaarkiin aad ka welwelsan tiihin inaad ilmahaada iskuul u dirtaan xilligaan. Waa muhiim inaad ogaato in masuuliyaddaadii sharchiyeed ee lagaaga rabay in ilmahaadu uu iskuulka xaadiro si ku meel gaar ah ayaa loo joojiyay teeramkaan. Ma jiro waalid ama daryeele la ganaaxi doono haddii ay doortaan inay ilmahooda gurigooda ku heystaan waqtigaan.

Waad ku mahadsan yihiin qaarkiinna ka soo jawaabay farriimiheennii koowaad oo aan ku ogaanaynay inaad ilmahiinna iskuulka u soo diraysaan xilligaan. Si aad u caawisaan qorshaynteenna aanna u xaqijinno inaan si buuxda ula soconno haddii ay jiraan wax dheeri ah oo aannu u baahannahay inaan xisaabta ku darsanno, aad ayaan abaal idii kaga heyn laheyn haddii aad ka jawaabi kartaan su'aalahaan muhiimka ee ku jira [warqadaan xog raadinta](#) ah. Waxey kugu qaadan doontaa qiyaastii 2 daqiqo si aad u buuxiso weyna na caawin doontaa si aan u caawinno dhammaan ardaydeenna isbuucyada soo socda. Xog raadintu waxa ay xirmaysaa maalinta Talaalada 9 JUUN 11:00 subaxnimo.

Waannu kula soo xiriiri doonaa adiga iyo ilmahaada mar kale isbuuca soo socda si aan kuula wadaagno jadwal billow ah iyo warar kale oo muhiim ah oo adiga iyo ilmahaadu ay tahay inaad la sii qabsataan inta aanan la gaarin 15 Juun.

Waxaan kuu rajeynayaa adiga, ardaydeenna iyo reerkiina wax fiican.




Cotham School, Cotham Lawn Road,
Bristol, BS6 6DT
Headteacher: Ms Jo Butler
t: 0117 919 8000
e: info@cotham.bristol.sch.uk
www.cotham.bristol.sch.uk

Mahadsanid

Jo Butler

(Maamule)



Cotham School: a charitable company limited by guarantee.

Registered in England: Company Number 07732888.

Registered Office: Cotham School, Cotham Lawn Road, Cotham, Bristol BS6 6DT